

Wax ka ogow Misaaniyadda Degmada

Miisaaniyadda Lagu Taliyay ee 2025-26



Ebony N. Shelton

Sarkaalka Sare ee Maamulka

Caroline Smith

Kaalayaha Madaxa Maamulka

Joan Bracci

Sarkaalka Sare ee Dhaqaalaha

Brian Albright, Maareeyaha Guud
Kooxda Maaliyadda Guud iyo Dawladda

Dr. Kimberly Giardina, Maareeyaha Guud
Hay'adda Adeegyada Caafimaadka iyo Aadanaha

Dahvia Lynch, Maareeyaha Guud
Kooxda Isticmaalka Dhulka iyo Deegaanka

Andrew Strong, Maareeyaha Guud
Kooxda Badbaadada Dadweynaha

Guddiga Kormeerayaasha



Banaan
Kormeere
Degmada 1



Joel Anderson
Kormeere
Degmada 2




**Terra
Lawson-Remer**
Kormeere
Degmada 3



**Monica
Montgomery Steppe**
Kormeere
Degmada 4



Jim Desmond
Kormeere
Degmada 5



Fariin ka timid

Sarkaalka Sare ee Maamulka



Ebony N. Shelton
Sarkaalka Sare
ee Maamulka

Anigoo ah Sarkaalka Sare ee Maamulka, waxaa sharaf ii ah inaan u adeego dadka Degmada San Diego iyo inaan soo bandhigo Miisaaniyadda Lagu Taliyay ee sanadkan. Annaga oo ogsoon in bulshooyinkeenu ay marayaan waqtiyo aan la hubin, iyadoo baahiyaha ay ka sii kordhayaan gees kasta oo ka mid ah gobolkeena, miisaaniyadan dheelitiran ee \$8.62 ah waxay ka tarjumaysaa sida qotoda dheer ee ay nooga go'an tahay u adeegida dadka deegaanka.

Waxay ka dhigan tahay koror 1% ah ee qorshihii sanadkii hore waxayna taageeraysaa 20,281.25 sano oo shaqaale ah — taas oo xaqiijinaysa in adeegyada asaasiga ah ay sii jiraan, iyadoo mudnaanta la siinayo maalgelinta wax ku oolka ah ee caafimaadka habdhaqanka, badbaadada dadweynaha, iyo xeeladaha lagu kordhinayo waxtarka inta lagu jiro xaaladaha maaliyadeed ee adag. Miisaaniyadani waxa ay ka tarjumaysaa masuuliyada iyo qalbiga labadaba—kuwaas oo ku qotoman adeeg bixin oo ayna hagayaan baahiyaha bulshadeena.

Caqabadaheenna hadda jira ah kuwa ugu culus ee aan la kulannay sannado badan waxaana ka mid ah maalgelinta federaalka ee suurtagalka ah iyo isbeddelada siyaasadda iyo sidoo kale hoos u dhigista dakhliga canshuurta ee heer gobol iyo heer degmo.

Waxaan aqoonsannahay inay jiri doonaan saameyno toos ah oo ku yimaada barnaamijyadeena iyo adeegyadeena, kuwaas oo qaarkood durba lagu daray miisaaniyadan lagu taliyey, iyo kuwa kale oo soo bixi doona marka ay xaaladuhu isbedelaan. Iyo, in kasta oo aynaan saadaalin karin dhammaan saamaynaha suurtagalka ah ee ku imaan kara hawlgallada guud sababo la xiriira isbeddellada dhaqaalaha, waxaanu miisaaniyadda u diyaarinaynaa si fikir iyo firfircooni ku salaysan. Waxaa naga go'an inaan noqono kuwo jawaab-celin iyo la-qabsi leh, oo bulshada ahmiyadda siiya inta aan si wadajir ah u dhex meerayno isbeddelladan bilaha iyo sanadaha soo socda. *(la sii wad.)*

Fariin ka timid

Sarkaalka Sare ee Maamulka *(la sii wad.)*

Si kale haddii loo dhigo, in kasta oo ay ku jiraan talooyin adag, miisaaniyadani waxay bixinaysaa dariiqo lagu abuurayo heer hubantinimo meeshii ay ka jirto hubanti la'aan waxayna abuuraysaa qaab-dhismeed xasilooni maaliyadeed siinaya mustaqbalka. Waxay isticmaalaysaa xalal cusub, loo dhan yahay iyo xalal xog ku salaysan si loo yareeyo saamaynta iyadoo la hagaajinayo sida aan u qaabaysannahay iyo sida aan u bixino adeegyada annagoo qiimaynayna xoogaga shaqalaha.

Tan ugu muhiimsan, miisaaniyada waxaa la sameeyay iyadoo la tixgelinayo talooyin laga helay idinka - deganayaasha iyo hawlgalayaasheena. Ka-qaybgalka bulshadu waxay udub dhexaad u tahay sida uu gobolku u shaqeeyo, waxaanu ururinnaa fikradaha dadka inta lagu jiro sanadka oo dhan, annagoo abuurayna fursado hal abuurimo iyo iskaashi leh si aan uga go'aan qaadano barnaamijyada iyo adeegyada muhiimka ah ee ay maalgeliso miisaaniyadda.

Miisaaniyaddu waxay sii waddaa inay maalgeliso guriyeynta, xalalka guri la'aanta, caafimaadka habdhaqanka - dadaallada muhiimka u ah taageeridda fayyo-qabka iyo adkeysiga bulshooyinkeena ka jira gobolka oo dhan.

Gaar ahaan, waxay sii waddaa ballanqaadka joogtada ah ee Degmada ee ku aadan kheyraadka caafimaadka hab-dhaqanka, iyada oo ka faa'iidaydaysanaysa fursadaha cusub ee maalgelinta si ay in ka badan \$100 milyan ugu maalgaliso ka guuritaanka socda ee nidaamka diiradda saaraya dhibaatada si loogu bedelo nidaam ah bixinta daryeelka marka hore kaas oo taageera soo kabashada muddada-dheer ah iyada oo loo marayo daawaynta bulshada ku salaysan, ka hortagga iyo waxyaabaha bedelka u ah xabsiga iyo qolalka xaaladaha degdegga ah. Waxayna taageertaa in ka badan 1 milyan oo dadka reer San Diego ah kuwaas oo u baahan marin u helka barnaamijyada shabakada badbaadada ee muhiimka u ah xaqiijinta dadka iyo qoysaska inay helaan cuntada iyo taageerada ay u baahan yihiin, barnaamijyada sida CalWORKs, Medi-Cal iyo CalFresh. *(la sii wad.)*

Fariin ka timid

Sarkaalka Sare ee Maamulka *(la sii wad.)*

Waxay kordhinaysaa maalgelinta badbaadada dadweynaha, iyada oo maalgelin dheeraad ah la siinayo waaxda Dab-damiska Degmada, Difaaca Dadweynaha, Baaraha Caafimaadka, Waaxda Asluubta iyo Xafiiska Sheriff-ka si loo bixiyo daryeelka dhalinyarada iyo dadka waaweyn ee ku jira xabsigayaga, si loo hawlgeliyo ambalaasyo badan iyo in la taageero barnaamijyada sida Beddel-u-helida Xabsiyaynta iyo tababarka shaqada, caafimaadka maskaxda iyo daaweynta khalkhalka isticmaalka muqaadaraadka. Waxayna Xarunta Ka-qaybgalka Bulshada ka abuuraysaa Xafiiskayaga Adeegyada Degdegga ah.

Miisaaniyada degmadeena waxa ay wali diirada saaraysaa in San Diego laga dhigo meel ay dadku ku kobcaan—halkaas oo dadka deegaanka ahi ay ku dareemaan in la taageerayo, iyo halkaas oo shaqaalaha degmada awood loo siinayo in ay dadka ugu adeegaan qalbi wanaag, ujeedo, iyo daacadnimo. Waxay ka tarjumaysaa sida ay nooga go'an tahay in aan xaqiijino in gobolkani uu sii ahaado meel aad u wanaagsan oo lagu noolaado, laga shaqeeyo, laguna ciyaaro oo u wanaagsan qof kasta oo ugu yeera guri.

Waxaan kugu martiqaadayaa inaad wakhti ku qaadato inaad sahamiso Miisaaniyadda Lagu Taliyay lafteeda - waa fursad aad si fiican oo aad ku fahamto sida aanu u maalgelinayno mustaqbalka bulshadeena. Waxaan sidoo kale kugu dhiirigelinayaa inaad ka qayb qaadato hannaanka miisaaniyada Degmada. Ka qaybgal kulanka dadweynaha ee Miisaaniyadda, ka xadir dhageysiga dadweynaha, ama sahmi siyaabo kale oo aad fikradaada ku wadaagto. Waxaad faahfaahinta dhacdooyinka iyo fursadaha ka qaybgalka ka heli kartaa boggayaga ka-qaybgalka Miisaaniyadda.



Ebony N. Shelton

Sarkaalka Sare ee Maamulka

Aasaaska

Aragtideena

Mustaqbal cadaalad leh, waara oo adkaysi u leh dhammaan dadka.

Himiladeena

Xoojinta bulshooyinkeena iyadoo la siinayo adeegyo cusub oo loo dhan yahay, iyo adeegyo bixintooda lagu salaynayo xog anagoo adeegsanayna shaqaale xirfad leh oo la taageeray.

Qiyamkeena

Lahaanshaha, Joogteynta, Heerarka, Helitaanka, Sinnaanta, Daacadnimada




Waxa uu Gobolku Qabto

18 Magaalooyin oo la isku daray

Aagga Aan la wadaagin

Magaalooyinka qandaraasyada



Magaalooyinka qaar ayaa sidoo kale heshiis kula jira degmada si ay u bixiyaan adeegyadan qaarkood.



Gobol ahaan, maamulka degmadu wuxuu bixiyaa adeegyada sida:

- Adeegyada bulshada iyo barnaamijyada caafimaadka
- Xeer ilaalinta dambiyada, xarumaha lagu hayo dembiilayaasha & u diyaargarowga xaaladaha degdega ah
- Kormeerka cuntada & makhaayadaha & la socodka biyaha xeebta
- Doorashooyinka



Aagga aan la wadaagin, dawladda degmadu waxay ka bixisaa waxyaabaha ay dawladda magaaladu caadi ahaan samayn lahayd sida:

- Dhaqangelinta sharciga & ilaalinta dabka
- Wadooyinka, jardiinooyinka & maktabadaha
- Ogolaanshaha dhismaha
- Hoyga & ilaalinta xoolaha

Xaggee Maalgelinta Ka Timid?

Kheyraadka kale

12%

Kharashyada Adeegyada

17%

Federaalka, gobolka ama dawlado kale

49%

Canshuuraha Guryaha

22%



Tixgelinada La Sameeyo Marka la Sameynayo Miisaaniyadda

Waajibaadyada gobolka

- Adeegyada ka jira aagga aan la wadaagin
- Barnaamijyada gobolka iyo federaalka ee loo baahan yahay sida adeegyada bulshada

Maalgelinta la heli karo

- Qiimaha kor u kacaya
- Isbeddellada maalgelinta gobolka iyo federaalka
- Maareynta kheyraadka si loo helo waaritaan muddo fog

Adiga! Fikradaada waxay gacan ka gaystaan qaabaynta mudnaanta miisaaniyada



Xogta

Tilmaamaha Guddiga Kormeerayaash

Hannaanka Miisaaniyadda

Degmadu waxay la shaqeysaa xubnaha bulshada inta lagu jiro sanadka oo dhan si ay gacan uga geystaan qaabeynta barnaamijyada iyo adeegyada oo ay wax ugu biiriyaan miisaaniyadda.

Booqo engage.sandiegocounty.gov si aad uga qaybqaadato.



Sarkaalka Sare ee maamulka ayaa soo saaraya miisaaniyada lagu taliyay marka la gaaro bisha Meey.



Macluumaadka miisaaniyadda waxaa lala wadaagayaa dadweynaha xilliga shirarka bulshada.



Ra'yi-celinta dadweynaha waxaa lagu bixinayaa khadka iyo marka la joogo dhegeysiyada dadweynaha.




Miisaaniyad dib loo eegay ayaa la diyaarinayaa.



Guddigu waxa uu ka doodaa oo uu ansixinayaa miisaaniyad dhaqangaleysa 1-da Luulyo.

Taariikhaha Muhiimka ah



Sida Looga Qaybqaato

Dib u eegis iyo faallo: Meey 1 – Juun 12

Khadka engage.sandiegocounty.gov/-2025-27

- limaylka engage@sdcounty.ca.gov
- Shirarka Dadweynaha/Bulshada markay tahay Meey 22 saacadu markay tahay p.m. ee Xarunta Hawlgallada ee Degmada
- Kulanka Bulshada ee Khadka wuxuu dhacayaa Meey 28 saacada 5:30 p.m.
- Taleefan soo dir ama qof ahaan u imow Juun 3 & Juun 9 si aad u hesho Dhagaysiyada Dadweynaha ee Guddiga Kormeerayaasha: sandiegocounty.gov/cob/bosa/
- **Codso turjumaad inta lagu jiro shirarka:** 619-531-5434 ama PublicComment@sdcountyca.gov

Booqo sandiegocounty.gov/budget
wixii macluumaad dheeraad ah



Daawo Kulamada
Guddida
Kormeerayaasha:



sandiegocounty.gov



[@countysandiego](https://www.youtube.com/@countysandiego)





[@SanDiegoCounty](https://twitter.com/SanDiegoCounty)



[@sandiegocounty](https://www.facebook.com/sandiegocounty)

Wadarta Miisaaniyadda Lagu Taliyay: **\$8.62 bilyen**

Sannad Canshuureed 2025- 26



- Koror \$85.8 milyan ah ama 1% ee Miisaaniyadda Sannad-maaliyadeedka 2024-25 ee La Dhaqangeliyay.

- Miisaaniyadan lagu taliyay waa mid isku dheeli tiran sida uu farayo sharciga gobolka. Miisaaniyada waxay ka tarjumaysaa u heellanaanta baahiyaha gobolka iyada oo la kala hormarinayo adeegyada loo idmaday lana dhimayo kharashaadka lagu bixinayo isbeddellada hadda jira iyo kuwa la filayo mustaqbalka ee heer federaal ah, iyo sidoo kale caqabado maaliyadeed oo dheeraad ah oo ay ku jiraan kobaca dhaqaalaha oo gaabis ah, kordhinta kharashyada iyo baahiyaha sii kordheya ee loo qabo adeegyada shabakada badbaadada Degmada. Dadaallada lagu maareynayo caqabadaha hadda jira iyo kuwa mustaqbalka waxaa ka mid ah:
 - Is-waafajinta heerarka adeegga iyo shuruudaha gobolka ee jira, sida wakhtiyada ka shaqeynta codsiyada ee barnaamijyada shabakada badbaadada sida Medi-Cal, CalFresh iyo CalWORKs.
 - Wax-ka-bedelida adeegyada aan waajibka ahayn ee ay bixiso Degmadu sida booqashada guriga ee kalkaalisada, daryeelka nasinta ee loogu talagalay daryeelayaasha qoyska korinta, adeegyada sharciga kiraystaha iyo adeegyada taageerada ka bixitaanka isbitaalka kadib ah.
 - In mudnaanta maalgelinta la siiyo kaabayaasha muhiimka ah iyo mashaariicda dayactirka ee waaweyn.
- Inkasta oo duruufaha maaliyaddu ay daruuri ka dhigayaan wax-ka-bedellada heerka adeegga ah, Degmadu waxay sii wadi doontaa inay buuxiso dhammaan heerarka adeegga ee loo igmaday waxayna raadin doontaa fursadaha maalgelinta ee u oggolaan kara kordhinta heerarka adeegga ee mustaqbalka.



Wadarta Guud ee Shaqaalaynta Lagu Taliyay: 20281.25

Sannad Canshuureed 2025- 26



Adeegyada
Caafimaadka &
Aadanaha

8075.5

(-168/-2.0%)



Badbaadada
Dadweynaha

8062

(-15/-0.2%)



Kooxda
Maaliyadda iyo
Dawladda Guu

1991

(+2/+0.1%)



Isticmaalka
Dhulka &
Deegaanka

2152.75

(-9/-0.4%)

- Tani waxay ka tarjumaysaa hoos u dhac 190 jago ah ama 0.9% ah ee sanad maaliyadeedka 2024-25 ee Miisaaniyada La Dhaqangeliyay iyadoo la adeegsanayo dhowr xeeladood si loo yareeyo saameynta, oo ay ka mid yihiin:
 - Baabi'inta ama inaan la buuxininba boosaska banaan qaarkood.
 - Isku-daritaanka hawlaha ka socda waaxaha iyo xafiisyada qaarkood halkaas oo shaqaalaha la isku bedbeddeli karo.
 - Maareynta tirada iyadoo la isticmaalayo habka yareynta shaqaalaha, taas oo macnaheedu yahay marka qof uu ka tago boos, waa inaan la buuxin booskaas si markaas si tartiib ah loogu yareeyo shaqaalaha.
- Dhimitaanadan waxay saameyn ku yeelan doonaan heerarka adeegga ee barnaamijyada iyo adeegyada qaarkood si kastaba ha ahaatee dhammaan adeegyada loo idmaday Degmada waxay ahaan doonaan kuwo sidoodii hore ah.
- Miisaaniyadda lagu taliyey waxaa ku jira xoogaa koror xaddidan oo shaqaale ah oo meelaha muhiimka ah oo ay ku jiraan ka soo kabashada musiibada gobolka iyo adeegyada badbaadada dadweynaha.
- In kasta oo ay jiraan isbeddelladan adag, waxaan aqoonsannahay in xooggeenna shaqada uu yahay hantideena ugu weyn ee bixinta adeegyada lagu taageerayo bulshada maxalliga ah. Miisaaniyadda lagu taliyay waxay wax ka qabataa baahiyaha shaqaalaha ee ah inay taageeraan shaqaale xirfad leh oo hal-abuur leh iyo waaritaanka maaliyadeed ee muddada dheer si loo helo mustaqbal adkeysa leh.

Qodobbada Miisaaniyadda

Qaybtani waxa ay bixisaa warbixino maalgalined – maalgelinta barnaamijyada iyo adeegyada lagu taageerayo bulshada. Waa sawir muujinaya waxa lagu soo daray miisaaniyada lagu taliyey, meelaha ka tarjumaya ballanqaadka baahiyaha gobolka iyadoo la maareynayo xaqiiqada caqabadaha maaliyadeed ee hadda jira iyo kuwa mustaqbalka, sida isbeddelka siyaasadda federaalka iyo arrimaha kale ee saameeya dhaqaalaha.

Caqabadahaas ayaa saameyn weyn ku yeelan doona habka aan u bixino adeegyada, oo qaar badan oo ka mid ah saameynta muddada fog weli lama garanayo. Waxaan sii wadi doonaa maaraynta khatarahaan anagoo adeegsanayna dhowr xeeladood oo ay ka mid yihiin:

- Kala hormarinta adeegyada qasabka ah – waxyaabaha laga rabo degmadu inay bixiso.
- Isku-darida/dib-u-qaabaynta iyo hagaajinta hawlgallada mar kasta oo ay suurtagal tahay.
- Dib u dhigista ama hakinta codsiyada maalgelinta cusub
- Wax-ka-bedellada maaliyadda ee muddada dheer si loo xaqiijiyo xasilloonida maaliyadeed.
- Kordhinta kheyraadka kale ee maalgelinta hadba marka ay suurtagal tahay.

Si aad wax badan uga barato maalgelinta meelo gaar ah, eeg miisaaniyada Degmada ee lagula taliyay ee buuxda.

Qodobbada Miisaaniyadda Guriyaynta iyo Guri-la'aanta



Fursadaha guriyeynta si loo daboolo baahiyaha bulshada, helitaanka hoy, guryeyn iyo adeegyo.

- \$132.1 milyan si gacan looga gaysto guriyeynta dadka nugul, horumarinta guryo qiimo ahaan la awoodi karo iyo in la gaaro isku filnaansho qoys.
- \$29.4 milyan oo loogu talagalay 40,000 kormeero oo dhismaha lagu samaynayo, dib u eegista qorshaynta, badbaadada guriga guurguura, iyo hagaajinta habka horumarinta si loo sameeyo guryo cusub.
- \$15 milyan loogu talagalay Barnaamijka Caawinta Hoyla'aanta ee Gobolka.
- In ka badan \$6 milyan oo lacagta deeqda ah ayaa weli diyaar ah si loogu caawiyo kuwa hoy la'aanta ah ee jooga webiyada San Diego iyo aagga Plaza Bonita.
- \$3.6 milyan si loogu caawiyo dhallinyerada guri la'aanta ah ama halista ugu jirta guri la'aanta inay helaan guryo rasmi ah.
- \$2.6 milyan oo loogu talagalay nadiifinta kaamka hoylaawayaasha iyo caawinta aagga aan la wadaagin iyo hantida Degmada.
- \$1.6 milyan si loogu hawlgeliyo Barnaamijyada Badbaadada Baarkinka ee Bancroft iyo Magnolia oo loogu talagalay dadka ku dhex hurda baabuurtooda. Goob saddexaad ee baarkinka badbaadada leh ah ayaa la qorsheeyay in si ku meel gaar ah loogu furo Grantville xagaaga 2025.
- Bilaabida dhismaha 60 Kabiinada Hurdada ee Wadooyinka si loo bixiyo hoy degdeg ah iyo adeegyo loogu talagalay qiyaas ahaan 140 qof sanad walba bulshooyinka aan la wadaagin.
- 16 dhisme guri oo qiimo ahaan la awoodi karo oo qayb ahaan ay bixiso Degmadu ayaa ku socda dhismo gobolka oo dhan. 18 kale oo dhismooyin ah ayaa ka socota shaqo.
- Kabitaan kiro oo \$500 bishiiba ah oo loogu talagalay ku dhawaad 400 oo waayeel ah oo dakhligoodu yar yahay, oo ay kiradu ku culus tahay.
- Koror \$13.1 milyan ah oo ku kordhay guriyaynta iyo kuwa hoylaawayaasha ah, oo ay ku jirto kaalmada kiraynta muddada-gaaban, ee loogu talagalay dadka qaba xaalado caafimaad oo daran oo xagga habdhaqanka ah.

Qodobbada Miisaaniyadda Caafimaadka Habdhaqanka



Caafimaadka dhimirka iyo taageerada isticmaalka maandooriyaha.

- Koror \$26.2 milyan ah oo ku korortay adeegyada bukaan-socodka ee isticmaalka mukhaadaraadka.
- Koror \$24 milyan ah oo ku korortay maaraynta kiisaska caafimaadka dhimirka, adeegyada deegaanka, adeegyada daryeelka degdegga ah, iyo isbitalka qayb ahaan cusub iyo adeegyada bukaan-socodka degdega ah ee carruurta iyo dadka waaweyn.
- Koror \$22.9 milyan ah oo ku korortay horumarinta raasumaalka si loo horumariyo, loo balaariyo loona ilaaliyo guddiga shatiyaysan iyo xarumaha daryeelka ee loogu talagalay dadka waaweyn iyo waayeelka.
- Koror \$17.2 milyan ah oo ku korortay barnaamijyada daaweynta isticmaalka muqaadaraadka iyo caafimaadka dhimirka.
- \$15 milyan oo lagu ballaarinayo shaqaalaha caafimaadka habdhaqanka iyo horumarinta tababar iyo barnaamij waxbarid.
- Koror \$14.6 milyan ah oo ku korortay laba xarun oo loogu talagalay xasilinta xasaradaha oo laga dhisayo El Cajon iyo Chula Vista.
- \$6.9 milyan oo loogu talagalay dib u cusboonaysiinta weyn ee Xarunta Carruurta ee Polinsky oo loogu talagalay in laga sameeyo xarun cusub oo 16-sariirood leh oo lagu daaweeyo dhibaataada caafimaadka dhimirka carruurta taas oo bixin doonta adeegyada xasilinta shaqsiyeed ee muddada gaaban.

Qodobbada Miisaaniyadda Badbaadada Dadweynaha



Dhaqangelinta sharciga, ilaalinta dabka, u diyaargarowga xaaladaha degdega ah iyo ka soo kabashada musiibada.

- \$3.5 milyan oo kor loogu qaadayo adeegyada caafimaadka degdega ah iyo dabka ee aaggaga Dulzura, Pauma Valley iyo Bariga Otay Mesa.
- \$3 milyan oo loogu talagalay nidaamka la socodka caafimaadka baayometriga si loo ogaado dhibaataada caafimaad ee dhalinyarada xabsiga ku jirta.
- \$3 milyan oo lagu dhisayo meel ku meelgaar ah inta lagu guda jiro xarun cusub u dhisida Sheriff oo laga dhisayo Ramona.
- \$840,000 iyo 5 shaqaale ah oo loo diro Xafiiska Adeegyada Degdega ah si loo sii taageero ka qaybgalka bulshada iyo dadaallada ka soo kabashada musiibada.
- \$2.2 milyan ayaa lagu maalgaliyay barnaamijka Meelaynta Xakamaynta Yar ee Tijaabada, oo ah barnaamij bulsho ku salaysan oo lagu taageerayo dhalinyarada dembiyada ku lug leh ee ku sugan deegaanada aadka u xaddidan, taas oo ka caawinaysa inay si badbaado iyo guul leh dib ugu soo biiraan bulshada.
- \$14.3 milyan oo loogu talagalay gadashada helikobtar loogu talagalay dab-demis la ballaariyay, iyo hawlgallada goobidda iyo samatabbixinta.
- \$1.2 milyan lagu soo iibinayo laba ambalaas oo loogu talagalay aagga aan la wadaagin.
- \$1.9 milyan oo loogu talagalay adeegyada gaadiidka iyo qalabka sun-ka-saarista ee Baarayaasha Caafimaadka.
- \$5.7 milyan oo lagu taageerayo qandaraasyada adeegyada caafimaadka dhimirka iyo Sheriff-ka.
- \$9 milyan oo loogu talagalay adeegyada macaamiisha Tijaabada, ugu horrayn si loo taageero kharashka qandaraas kordhinta ee la xiriira adeegyada daryeelka caafimaadka dhalinyarada.
- Lix ka mid ah shaqaalaha Asluubta/Tijaabada oo uu ku jiro sarkaalka wata eeyga tababaran ee dheeraadka ah si uu u taageero dhalinyarada Asluubta/Tijaabada.
- Kheyraad cusub iyo Xarunta Dib-u-soo-gelintaan ayaa la qorsheeyay si ay uga caawiso dadkii hore u xirnaa inay helaan agabyada iyo taageerada ay u baahan yihiin si ay si guul leh dib ugu soo galaan bulshada.

Qodobbada Miisaaniyadda

Kaabayaasha dhaqaalaha



Waddooyin, dhismayaal, dayactirro muhiim ah, saldhigyada Sheriff, maktabado, jardiinooyin iyo horumarinada kale ee bulshada.

- \$48.3 milyan oo loogu talagalay badbaadada waddooyinka oo ay ku jiraan calaamadaha tarafigga, jid-gooyada, isgoysyada dadka lugeynaya, jidadka ilaalada iyo waddooyinka cusub iyo jidadka baaskiilka.
- \$47.8 milyan oo lagu hawlgelinayo 33 maktabadood, afar baabuur oo koronto ku shaqeysa, shan dukaanno buugaag ah oo otomaatig ah iyo maktabadda elektaroonigga ah.
- \$35.9 milyan oo lagu hawlgelinayo 158 tas-hiilaad oo baarkin ah, 58,459 ekar oo dhul jardiinooyin ah iyo 389 mayl oo waddooyin ah.
- \$29 milyan si loo dhiso jeelasha Sheriff-ka, oo ay ku jiraan cusboonaysiinta nidaamka digniinta dabka, qalabyada amniga, iyo tignoolajiyada dheeraadka ah si loo taageero badbaadada, amniga, iyo u hogaansanaanta xeerarka.
- \$9 milyan oo lagu cusboonaysiinayo Xarunta Xabsiyaynta Dhalinyerada ee Bariga Mesa.
- Koror \$5.7 milyan oo wadarta ka dhigaysa \$71.3 milyan si loogu dayactiro 2,000 mayl ee waddooyinka Gobolka ah.
- Koror \$145,000 ah wadarta ka dhigaysa \$4.8 milyan si loo nadiifiyo biyo-mareennada, kanaalada iyo bullaacadaha si looga hortago fatahaadda duufaanta.
- \$1.5 milyan oo lagu dhiso taawarka tababarka dabka.
- Dib u dhiska Mira Mesa Epicenter si looga dhigo xarun bulsho oo Degmadu maamusho oo la qorsheeyay in la furo dayrta 2026.
- Maktabada cusub ee Casa de Oro oo furmi doonta guga 2026.
- Qayb cusub oo ah qalliinka caafimaadka xoolaha ee guurguura si ay u bilaabaan bixinta adeegyada aasaasiga ah ee fayoaqabka xayawaanada kuwaas laga bixiyo aaggaga aan la wadaagin ee ugu baahida badan.

Qodobbada Miisaaniyadda Dadka Nugul



Nafaqada, caafimaadka, maaliyadda iyo barnaamijyada kale si loo caawiyo shakhsiyaadka iyo qoysaska nugul.

- \$843.5 milyan oo lagu caawinayo in ka badan milyan qof oo aan haysan hab kale oo taageero ah si ay u helaan gargaarka cuntada ee CalFresh, caymiska caafimaadka Medi-Cal, CalWORKS, iyo gargaarada kale ee dadweynaha.
- \$489.1 milyan oo lagu xoojinayo laguna mideynayo qoysaska iyo carruurta halista ku jira.
- \$154.9 milyan oo lagu caawinayo qoysaska taageera carruurta korinta iyo korsashada.
- Koror \$11.5 milyan oo wadarta ka dhigaysa \$223.5 milyan oo loogu talagalay Adeegyada Taageerada Guriga ee dadka waaweyn iyo dadka naafada ah.
- Xarunta Caddaaladda Qoyska ee Koonfurta Degmada waxay furmi doontaa 2025 waxayna bixin doontaa adeegyada ka soo kabashashada dhaawaca oo dhammaystiran oo la siinayo kuwa u baahan. Dukaanka halka joogsi leh wuxuu noqon doonaa sida Xarunta Cadaalada Qoyska ee Waqooyiga Degmada ee San Marcos.
- Maalgelin joogto ah si 1.5 milyan oo cunto loo siiyo dadka waaweyn iyadoo la isticmaalayo goobaha bulshada, goob cuntada laga qaato, ama guri geynta cuntada.
- Laba beerood oo bulsho ayaa loo samaynayaa Spring Valley iyo Ramona si loo kordhiyo haqab-beelka cuntada ee bulshooyinka dakhligoodu hooseeyo.

Qodobbada Miisaaniyadda Joogteynta Deegaanka



Ilaalinta deegaanka dabiiciga ah si loogu kaydiyo jiilalka mustaqbalka.

- \$23.6 milyan oo lagu ilaalinayo biyaha gobolka iyo mashaariicda cusub ee kaabayaasha cagaaran.
- \$4.15 milyan oo loogu talagalay rakibaadda saldhigyo cusub oo baabuurta korontada lagu jaajeraysto oo dadweynaha loogu talagalay iyo jaajarada baabuurta korontada ee degdegga ah ee gobolka ee dhulka miyiga ah.
- Koror \$1.6 milyan ah oo wadarta ka dhigaysa \$4.1 milyan si loo fuliyo Qorshaha Wax-ka-qabadka Cimilada.
- \$1.7 milyan oo lagu kormeerayo loogana warbixinayo tayada biyaha xeebaha iyo gacanka.
- \$1.6 milyan oo lagu yareynayo gaaska halista ah.
- \$1.3 milyan oo lagu wanaajinayo Dooxada Wabiga Tijuana iyada oo la jarayo lana soo celinayo bilicda deegaanka.
- \$1 milyan oo lagu beerayo 2,000 geed ee dhismooyinka Degmada si loo yareeyo gaaska halista ah.

Mudnaan Dheeraadka ah



- \$267.3 milyan oo loogu hortaggayo cudurrada faafa iyo faafitaanka cudurka iyo in la xaqiijiyo in dhammaan dadka ay isticmaali karaan Xarumaha Caafimaadka Dadweynaha, barnaamijyada booqashooyinka guriga iyo adeegyada dawooyinka.
- Maalgelinta lagu hawlgelinayo shaybaarka caafimaadka dadweynaha oo casri ah oo \$93 milyan galaysa kaas oo ilaalin doona dadweynaha iyada oo laga baarayo cudurrada faafa.
- \$1 milyan oo lagu hawlgelinayo Safe Destination Nights, oo ah barnaamij dugsigga kadib ah oo u adeega 8,000 dhalinyaro ah.
- \$15.6 milyan oo gacan looga gaysano ilaalinta caafimaadka bulshada iyadoo la kormeerayo lana daweynayo 1,600 goobood oo goobaha kaneecada ah ee la yaqaan.



www.sandiegocounty.gov

1600 Pacific Highway, San Diego, CA 92101